HERITAGE INSTITUTE

5 Faallo

Nofeembar 2023

# Dhibaatada Naf iyo Maalba Leh ee ay Soomaaliya u Gaysatay El Nino: Baaqa Tallaabooyinka Kala Gudboon Dowladda Soomaaliya



## Ku saabsan qoraaga

Dr. Cabdiqani Cabdullaahi Mucallim, waxa uu shahaadada PhD ka haystaa Cilmiga Ingineeriyadda ee la xiriira Khayraadka Biyaha iyo Carrada, waana mid ka mid ah jaalleyaasha siyaasadda Machadka Heritage. Sida oo kale waxa uu lataliye sare oo Biyaha iyo Waraabka ah ka yahay wasaaradda Beeraha iyo Waraabka Soomaaliya.

**Xuquuqda daabacaaddan © 2023 | Waxa ay u dhawrsan tahay Machadka Daraasaadka Siyaasadda ee Heritage.**

Akhristayaasha waxa lagu dhiirrigalinayaa in ay sii tarmiyaan xogtan, oo ay iskood u daabacaan, balse sinaba ugama ganacsan karaan. Xaqle ahaan, Machadka Heritage waxa uu si xushmad leh uga codsanaynaa cid kasta oo daabacaddan sii badisaa, in ay mahadnaq iyo nuqul daabacaaddeeda ka mid ah noo hibayso. Adeegsiga khadka tooska ah, waxa aan waydiisanaynaa akhristayaasha in ay ku xirnaadaan macluumaadka shabakadda.

**© Heritage Institute 2023.**

## Hordhac

> *Baaqyo degdeg ah oo ka digaya in xaaladdu noqoto musiibo bini'aadantinimo ayaa loo diray qurbajoogta Soomaaliyeed iyo beesha caalamka*

Tan iyo bishii Oktoobar waxa Soomaaliya ka da'ayay roobab mahiigaan ah oo loo aaneeyey in ay keentay cimilada gobolka ee la xiriirta kor u kaca heerkulka biyaha hawada ee loo yaqaanno El Nino, kuwaas oo sababay daadad xooggan oo barakiciyey ku dhowaad 5000 oo qof, guud ahaan dalka Soomaaliya, taas oo dadkii ay saamaysay badbaadintooda iyo quudintoodu argagax ku abuurtay dowladda Soomaaliya iyo hay'adaha gargaarka. Baaqyo degdeg ah oo ka digaya in xaaladdu noqoto musiibo bini'aadantinimo ayaa loo diray qurbajoogta Soomaaliyeed iyo beesha caalamka. Madaxa Hay'adda Maareynta Masiibooyinka Soomaaliya mudane Maxamed Macallin Cabdulle ayaa arrintan ku tilmaamay xaalad aad u "daran".

Tan iyo 1990, waxa Soomaaliya soo maray ku dhowaad 30 masiibo oo cimilada la xiriira, kuwaas oo ahaa 12 abaarood iyo 18 daad oo xooggan. Sannadihii 2006 iyo 2011, waxa Koonfurta Soomaaliya ka da'ay roobab ma hiigaan ah oo dhaliyey daadad xooggan, kuwaas oo barakiciyay boqollaal kun oo qof, islamarkaana xannibay qaybinta adeegyada bini'aadantinimada. Sannadkii 2018, waxa ay daadadku barakiciyeen dad gaaraya 215,000, waxaanay saameeyeen in ka badan 630,000 oo qof oo ku dhaqan gobolka Hiiraan. Sida oo kale, sannadkii 2019 ayay roobab mahiigaan ah oo ka da'ay qaybo ka mid ah Soomaaliya dhaliyeen daadad barakiciyey ku dhowaad 500,000 oo qof. Roobab kale oo ka da'ay degmada Beledweyne ayaa Sannadkii 2020 dhaliyey daadad barakiciyey 400,000 oo qof, islamarkaana saameeyay hal milyan oo kale.

Inkasta oo oo ay Hay'adda Saadaasha Hawada Adduunku ka digtay suuragalnimada in ay sannadka 2023 marka kale Soomaaliya ka da'aan roobab mahiigaan ahi maadaama heerkulka biyaha hawada ku jira ee loo yaqaanno El Niño gaadhay 90%, haddana dowladdu waxa ay qaadday tallaabooyin xaddidan oo lagu yaraynayo khatarta ku soo foolka leh dalka, taasina waxa ay muujineysaa sida ay u liidato awoodda ay Soomaaliya u leedahay maaraynta khataraha ka dhasha masiibooyinka dabiiciga ah.

## Xaaladda Hadda Taagan

> *Sida uu shaaciyay Xafiiska Qaramada Midoobay u qaabilsan Xiriirka Arrimaha Bani'aadantinimada (UNOCHA), roobabkii ugu danbeeyay waxa ku dhintay 42 qof, waxaana ku barakacay 5000 oo kale, halkay ay ka saameeyeen in ka badan 1.17 milyan oo qof*

Sida uu shaaciyay Xafiiska Qaramada Midoobay u qaabilsan Xiriirka Arrimaha Bani'aadantinimada (UNOCHA), roobabkii ugu danbeeyay waxa ku dhintay 42 qof, waxaana ku barakacay 5000 oo kale, halkay ay ka saameeyeen in ka badan 1.17 milyan oo qof. Dadka ay roobabku saamaynta ugu weyn ku yeesheen waxa ka mida bulshooyinka ku dhaqan Koonfurgalbeed, Hirshabeelle, Jubbaland iyo Galmudug. Sida oo kale roobab xooggan oo ka da'ay magaalooyinka Baydhabo, Gaalkacayo, Jowhar, Kismaayo, iyo Baardheere ayaa gaystay khasaare naf iyo maalba leh.

- Dowlad-goboleedka Koonfurgalbeed oo ahaa kan ugu daran waxa ay xaaladdu saamaysay ku dhowaad 400,000 oo qof. Roobab mahiigaan ah oo xaddiga biyahooda lagu qiyaasay 300 oo millimeter ayaa 10 cisho gudahood ka da'ay Baydhabo. Sida ay sheegtay Wasaaradda Tamarta iyo Khayraadka Biyaha Soomaaliya, waxa ay roobabku saamaynta ugu weyn ku yeesheen dadka barakacayaasha ah. Waxa ku burburay ku dhowaad 1,077 dhisme oo ah kuwa fayadhowrka.

- Jubbaland, ugu yaraan 100,000 oo qof ayaa barakacay. Buundada Baardheere oo halbowle u ah isu socodka gobolka Gedo iyo gobollada kale, ayaa burburtay, taas oo xannibtay adeegyadii gargaarka,islamarkaana joojisay isu socodka bulshada iyo saadka cuntada.

- Dowlad-goboleedka Hirshabeelle, waxa ay daadadku saamayn daran ku yeesheen 50,000 oo qof oo ku noolaa Beledweyne, iyaga oo waxyeello u gaystay guryo, waddooyin iyo saadad cunto. Toddoba carruur ah ayaa ku dhimatay. Sida oo kale, roobab mahiigaan ah oo ka da'ay koonfurta magaalada Jowhar ayaa baabiiyay hanti iyo dhul beereedyo muhiim ah.

- Dowlad-goboleedka Galmudug, waxa ay daadadku dumiyeen guryo(teendhooyin) ay ku noolaayeen dad barakacayaal ahi, waxaanay jareen xargaha korontada iyo internet-ka. Laba gabdhood oo gashaantimo ah iyo qof yar oo carruur ah ayaa ku dhintay daadadkaas.

- Dowlad-goboleedka Puntland, waxa ay roobabka iyo daadadku saameeyeen ugu yaraan 22,200 oo qof, waxaanay guryahoodii ka barakiciyeen 7,500 oo qof.

## Casharrada muhiimka u ah dowladda Soomaaliya

> *"Dowladda Soomaaliya waxa looga baahan yahay in ay qaaddo tallaabooyin degdeg ah oo wax lagaga qabanayo xaaladda roobabka, iyada oo mudnaanta kowaad siinaysa ilaalinta bulshada iyo badbaadinta noloshooda*

Dowladda Soomaaliya waxa looga baahan yahay in ay qaaddo tallaabooyin degdeg ah oo wax lagaga qabanayo xaaladda roobabka, iyada oo mudnaanta kowaad siinaysa ilaalinta bulshada iyo badbaadinta noloshooda.

Haddii ay xaaladdu sidaan ay hadda tahay ku sii socoto, waxa halis galaya malaayiin Soomaali ah oo aan wax digniin ah ka helin masiibooyinka ka dhalan kara roobabka la odorosay ee dhowaanahan la filayo, kuwaas oo mar kale horseedi kara khasaare naf, maal, iyo kaabayaal dhaqaalaba leh, iyo sida oo kale barakac baahsan iyo dhibaatooyin bini'aadantinimo oo lama filaan ah.

- Waa in la horumariyaa nidaamka digniinaha feejigan. Waxa nafaha dadka iyo hab-nololeedka bulshadaba badbaadin kara u diyaar garowga cawaaqibxumada ka dhalan karta kororka roobabka, abaaraha, iyo isbeddelka heerkulka. Nidaamka digniinaha goor hore la shaaciyo ayaa muhiim u ah in si wax ku ool ah loo yareeyo, loona xakameeyo khataraha ka dhasha musiibooyinka, maadaama in xogaha la faafinayo goor hore ay dowladda u suuragalinayso in ay si fiican ugu xidhnaato dadwaynaha ku dhaqan goobaha halistu ka jirto. Nidaam digniineed oo ku salaysan in bulshada goor hore looga digo daadadka, laguna wacyigaliyo masiibada daadadka iyo daadguraynta, iyo khariiradaha la socodka daadadka ayaa bulshooyinka si fiican uga caawinaya aasaaska hab-nololeed adkaysin u leh,kana caawinaya maaraynta iyo iska caabbinta waxyeellooyinka cimilada.

- Sida oo kale, waa in ay dowladdu hawlaheeda ka qaybgelisaa deeqbixiyeyaasha si ay u dejiso qorshe lagu maareynayo halista daadadka, si loo yareeyo khasaaraha dhaqaale ee joogtada ah, loona xakameeyo saameynta daadadka. Waa in qorshaha lagu darsadaa dhisidda goobo wax lagu daadgureeyo iyo teendhooyin la siiyo dadka danyarta ah. Sida oo kale, waa in qorshaha lagu daraa in biyo nadiif ah la siiyo barakacayaasha iyo dadka ay saameeyeen daadadku.

- Waa in tixgalin gaar ah la siiyo abuuridda jid iyo jawi wacyigelineed, u diyaargarow, iyo wacyigelin bulsho oo la xiriirta El Niño. Waa in la wanaajiyaa hannaanka xog-wadaagiseed ee u dhaxeeya hay'adaha dawladda iyo hay'adaha samafalka.

- Waa in la moosaa gabiyada webiyada, laguna xidhaa waxyaalaha daadadka iyo fatahaadadaha xakameeya, sida biyo-xidheenno lagu dayactirayo gobollada webiyada leh sida Shabeelle iyo Jubba oo dhaqaalahoodu ku tiirsan yahay beeraha iyo xoolaha. Bulshooyinka ku nool gobollada webiyada leh waa in sida oo kale loo sameeyaa barnaamijyo wacyigelineed oo la xiriira saamaynta ay isbeddelka cimiladu ku leedahay nolosha aadanaha, khayraadka biyaha iyo xoolaha.

- Saamaynta ka dhalata El Niño ayaa keeni karta sicirbarar, sababi kara cunto yaraan. Sidaa darteed, dowladdu waa in ay hubisaa in dadka beeralayda ahi helaan taageero ku habboon, oo ay ku jirto kaalmo dhaqaale.

- Waxa lagu baraarugsan yahay in ay daadadku  kordhiyaan faafitaanka cudurrada biyaha ku gudba. Asaaska koox caafimaad oo dowladda ka caawisa u diyaargarowga iyo ka falcelinta cudurrada ka dhasha daadadka ayaa ah arrin muhiim ah. Arrintan waxa lagu hanan karaa isku xidhnaanta oo la sugan iyo xiriirka u dhexeeya hay'adaha ay khusayso oo la wanaajiyo.

- Bulaacadaha iyo daadmareennada magaalada waa in dib loo hagaajiyaa si loo yareeyo khatarta fatahaadaha, loogana hortago burburka hantida iyo waddooyinka.

- Dowladdu waa in ay xil iska saartaa soo saarista farriin digniin ah, taas oo muwaaddiniinta ku boorrinaysa in ay guryahooda ku jiraan xilliyada ay da'ayaan roobka xooggan ee duufaannada wataa.

- Sida oo kale, waa in tixgalin la siiyaa dhaqangelinta Xeerkii Korontada Qaranka ee dhowaan la shaaciyey, si looga hortago khataraha naf iyo maalba leh ee ka dhalan kara korantada xilliyada ay da'ayaan roobka xooggan ee onkodka iyo dabaylaha wataa.

- Dowladdu waa in ay si fiican uga faa'iidaysataa dhinacyada togan ee El Niño. Daadadka waxa laga dhaansan karaa kaydad biyood oo baaxad leh, kuwaas oo kor u qaadaya xaddiga biyaha kaydka ah, iyo sida oo kale horumarinta dhul-daaqsimeedka iyo calafka xoolaha iyo waliba wax soo saarka xoolaha.

- Beeralayda maxalliga ah waa in laga taageero horumarinta tabaha wax-beerashada, sida in wax la beerto ka hor inta aanay curannin roobabka la filaayaa. Koboca wax soo saarka beeruhu waxa ay wanaajin doonaan sugnaanta cuntada, gaar ahaan gobollada ay inta badan soo foodsaaraan cunto yaraantu.

HERITAGE
INSTITUTE

The Heritage Institute for Policy Studies
http://www.heritageinstitute.org